PATIENT EDUCATION

Tilmaamaha Nadiifinta Caloosha

Kaamarada Lagu Eego Qeybta Sare Ee Caloosha (Pouchoscopy or Ileoscopy)
Magnesium Citrate (Magniisiyam Sitreyt)

Waa muhim in aad raacdo tilaamamaha u diyaargaroowga baaritaanka. Mindhicradaadu waa in ay marnaadaan, si dhakhtarku u arki karo xilliga baariitaanka. Bukaanka qaarkood waxaay dareemaan in diyaarfaroowga ay tahay qeybta ugu adag ee baaitaankan.

U diyaargaroowga Kaamarada Lagu Eego Qeybta Sare Ee Caloosha (pouchoscopy or ileoscopy)

- Maalinka ka horeysa eego qeybta sare ee caloosha, waa in aad bilowdaa diyaarinta calooshaada.
- Ha cunin cunto adag maalinta ka horeysa baaritaanka.
- Waxa aad isticmaaleysaa Magnesium Citrate (Magniisiyam Sitreyt) si aad calooshaada u diyaariso oo aad u nadiifiso mindhicirkaaga.
- Haddii horay kuugu dhaceen cudurada wadnaha noocyadiisa kala duwan, waa in aadan qaadan dawada caloosha jilcisa ee Miralax oo la xiriir dhakhtarkaer kuu qoray baaritaanka.
- Fadlan raac tilmaamahan dhamaantood si taxadar leh. Haddii aadan tilmaamahan u raacin si sax ah, waxaa laga yaabaa in tuubada kaamarada ee lagu eego qeybta sare ee caloosha la baajiyo.

Waxyaabaha aad iibsaneyso

- Si aad isugu diyaariso baaritaanka, waxaa lagaa doonayaa in aad iibsato waxyaabaha halkan ku xusan oo lagu nadiifiyo caloosha.

- **Looma baahna daawo dhakhtar kuu qoro**
  - ☐ Hal dhalo oo ay ku jiraan 10 wiqiyadood oo Magnesium Citrate (Magniisiyam Sitrate) ah.

Macluumaadka Daawada

Waxaa laga yaabaa in lagaa doonayo in aad joojiso qaar ka mid ah daawooyinka aad qaadato ama aad wax ka bedesho baaritaanka ka hor.

- **Dhiig Khafiifiyayaasha**
  - Sida (warfarin), Ticlid (ticlopidine hydrochloride), Agrylin (anagrelide), Xarelto (Rivaroxaban), Pradaxa (Dabigatran), Pletal (Cilostazol), Brillinta (Ticagrelor), Eliquis (Apixaban), Effient (Prasugrel), and Plavix (Clopidogrel).
  - Waa in aad latashataa dhakhtarka daawada kuu qoray ama qof ku takhasusay ugu yaraan 2 todobaad ka hor xilliga balanta. Ha joojin qaadashada daawada adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
- **Daawada Insuliinta iyo Macaanka (Sokoroowga)**
  - Fadlan la xiriir dhakhtarkaaga la socda heerka sokortaada. Waxaa laga yaabaa in loo baahdo in wax laga bedelo taasoo ku xiran cuntada aad cunto ee loo baahan yahay nadiifinta caloosha. Ha joojin qaadashada daawada adiga oo aan ogolaasho ka helin dhakhtarkaaga.
- **Asbiriin**

- Waxaa laga yaabaa in aad qaadan karto Aasbiriinka sida dhakhtarku kuugu qoray adiga oo biyo ku kabanaya.

Shan (5) maalmood ka hor maalinta qeybta sare ee caloosha

- Ha qaadan daawooyinka caloosha socota (shubanka) joojiya.
  - Tusaale ahaan: Imodium ama Pepto-Bismol.
- Ha qaadan daawooyinka caloosha jilciya ama fitamiinada dheeraadka ah.
  - Tusaale ahaan: Metamucil ama Citrucel.
- Ha qaadan daawooyinka laga helo birta ama lagu bedesho daawada birta.
  - Tusaale: Fitamiinada kala duwan (Multi-vitamins).
- Ha qaadan daawooyinka laga sameeyo saliidda kaluunka ee aan dhakhtar qorin..

Sadex (3) maalmood ka hor maalinta kaamarada lagu eego qeybta sare ee caloosha

- Ku bilow cunto fudud oo ay ku yar yihiin waxyaaba caloosha jilciya. Cuntada ay ku yar tahay waxyaabaha caloosha jilciya waxa ay caawisaa in ay si wanaagsan u nadiifiso caloosha.
- Cuntada caloosha jilcisa waxaa ka mid ah:
  - Rootiga cad, bariiska cad, baastada, buskudka, kaluunka, digaaga, ukunta, hilib shiidan, lawska shiidan, khudaar la kariyey, faakiho gasacadeysan, mooska, batiikh, caanaha, garoorka, farmaajada, waxyaabaha la mariyo ansalaatada iyo carfiyayaasha cuntada.
- Ha cunin cunto ay ku badan tahay waxyaabaha caloosha jilciya sida:
  - Daangada, miraha (noocyada kala duwan ee miraha la qariido sida gabal dayaha), rootiga ama baastada ka sameysan qamadiga, miraha la qalajiyey, ansalaatada, khudaarta ceyriin, faakihada cusub ama la qalajiyey. Xadid tirada aad hilibka ka cunto.

Laba (2) maalmood ka hor baaritaanka pouchoscopy or ileoscopy

- Cabitaanka biyaha badso.
- Ku bilow cunto fudud oo ku yar yihiin waxyaabaha caloosha jilciya.

☐ Imaatinka Isbitaalka ee Subaxa/Galabta

(6:30 aroornimo ilaa 3:45 galabnimo)

Hal (1) maalin ka hor baaritaanka pouchoscopy or ileoscopy

- Biloow cabitaanka biyo cad.
- Cab biyo cad oo kaliya maalinta ka horeysa oo dhan Flexible Sigmoidoscopy tkaamarada lagu eego qeybta sare ee caloosha.
- Biyaha cad waxaa ka mid ah:
  - Biyo, qaxwe madoow, ama shaah (aan caano ama boolbire laheyn), maraq cad ama baroodo cad, Gatorade, biyo ubriya kuwa aan ubrin (Coke, Sprite), cabitaan casiir aan miro laheyn (tufaax, cinabka cad, karambari cad), Jell-O, ama jalaato baraf. **Xusuusnoow, ha cabin cabitaan casaan ama midabka hurdiga ah.**
- Ha cunin wax cunto ah oo adag.
- 6da galabnimo, waa in aad cabtaa dhalada 10 wiqiyadood ah oo dhan ee Magnesium Citrate.
- Dadka qaar baa dareema yalaalugo ama lalabo, dibiro, ama matag. Haddii ay sidaas kugu dhacdo, u naso 15-30 daqiiqo, ka dibna isku day in aad cabitaanka sii wado.
- Ka dib marka aad dhameyso cabitaanka Magnesium Citrate, waxa aad cabi kartaa biyo cad oo kaliya.
- Waa in aad ka ag dhawaataa suuliga ka dib marka aad bilowdo qaadshada daawada. Waxaa kugu dhacaya shuban waxaadna u baahaneysaa in aad si degdeg ah u gaarto suuliga.

Maalinta balanta kaamarada lagu eego qeybta sare ee caloosha

- Calooshaada ma sameyneyso wax saxaro ah, laakiin biyo midabka jaalaha ah ayaa kaa soconaya.
- Waxa aad cabi kartaa biyo ugu dambeyn laba saacadood ka hor balantaada dhakhtarka.

- Ka fogoow cabitaanka casaanka ama hurdiga ah, caanaha, casiirka boritiinka ah, cabitaan ay alkolo ku jirto, iyo isticmaalka maandooriyayasha. Taasi waxa ay keeni kartaa in balantaada kaamarada lagu eego qeybta sare ee caloosha la baajiyo.
- Daawada aad subixii cunto waxa aad ku kaban kartaa biyo.
- Xusuusnow, ha cunin wax cunto ah oo adag.
- Waxaa laga yaabaa in aad u baahan tahay in aad siiso waqti ku filan oo aad ku gaarto balantaada maadaama laga yaabo in aad isticmaalka suuliga u baahato oo aad u istaagto.

Fariin/Tilmaamo gaar ah: